



CHATHAM HOUSE

Chatham House, 10 St James's Square, London SW1Y 4LE

T: +44 (0)20 7957 5700 E: contact@chathamhouse.org

F: +44 (0)20 7957 5710 www.chathamhouse.org

Charity Registration Number: 208223

Africa Programme Conference Summary

Halka ay Somaliland Kaga jirto Dunida

Warbixin ka soo baxdey kulan

Disembar 2011

The views expressed in this document are the sole responsibility of the authors and do not necessarily reflect the view of Chatham House, its staff, associates or Council. Chatham House is independent and owes no allegiance to any government or to any political body. It does not take institutional positions on policy issues. This document is issued on the understanding that if any extract is used, the authors and Chatham House should be credited, preferably with the date of the publication.

Horudhac

Bishii Luuliyo ee sanadkii 2011, Chatham House ayaa qabtey shir yar oo ay isugu yimaadeen siyaasiyiin Somaliland, bulshada rayidka ah, qurbajoogta iyo mufakiriinta oo ay weliba weheliyaan khubaro iyo ka warqabayaal ka soo jeeda dhinacyada beesha caalamka ee la macaamila. Shirka ulajeedadiisu waxaa ay aheyd in laga hadllo halka ay Somaliland kaga jирто dunida ka dib labaatan sanadood oo ka soo wareegtey madaxbannaanida aan la aqoonsaneyn ee ay iskeed ugu dhawaaqday.

Kulanku waxaa uu raadiyey in uu dhiiri geliyo in si cusub looga fikiro Somaliland ayadoo meel dhexdhixaad ah oo gaar ahna lagu qabtey shirkalaga dhaqmay xeerka Chatham House. Warbixintan kooban ee kulanka kasoo baxdey waxaa ay soo bandhigeysaan waxyaalo ka mid ah arimihii xiisaha badnaa ee kulanka looga wada hadley. Ulajeedadu ma aha in si buuxda loo soo gudbiyo wadahadalkii shirkaloo dhan, balse waa in la is weydiyo su'aalo muhiim u ah Somaliland iyo inta la macaamisha.

Waa maxay ictiraafka ay hadda haysato Somaliland?

Dhibaato muhiim ah oo hortaalla Somaliland iyo inta la macaamisha waa su'aasha ku saabsan ictiraafka. Inkasta oo ay Somaliland gacanta ku haysto dhulka ay sheeganeyso badankiis, isla markaana ururin karto canshuuro, dadkana u fidin karto adeegyada qaarkood, isla markaana qabatay doorashooyin dimuquraaddi ah oo dhowr jeer dhacay, haddana Somaliland weli ma helin maqaam caalami ah oo rasmi ah. Somaliland waxay sheeganeysaan aqoonsi haddana balse ma hayso waddo dastuuri ah ama caalami ahaan la aqoonsan yahay oo ay ku heli karto aqoonsi.

Qorshooyin cusub ayaa raadinaya waddooyin la taaban karo oo ay Somaliland ugu dhex shaqeyn karto nidaamka caalamiga ah ayada oo aan haysan ictiraafka caalamiga ah. Fikradaha waxa ka mid ah in deeq bixiyaasha caalamiga awood loo siiyo in ay dhaqaale ku shubaan sanduuq ay isla maamuli karaan deeq bixiyayaasha caalamka iyo dowladda Somaliland – maadaama ay tahay dowlad aan la ictiraafsaneeyn oo aysan u bannaaneyn in si toos ah loo siiyo taageero kabta miisaaniyadeeda. Qaabab cusub oo xiriir ah, ha ahaadeen kuwa dhaqaale ama diblomaasiyadeed, ayaa waxaa ay muujinayaan horumar la gaarey haddana. Nidaamkaa cusub ayaa loo arki karaa in la aqoonsaday xaaladda u gaarka ah Somaliland, intii laga soo qaadi lahaa Somaliland in la aqoonsan yahay ama mustaqbalka la aqoonsan doono.

Udub dhedaadka siyaasada dibada ee Soomaaliland waa in loo aqoonsado waddan waddan madax bannaan. Inta la macaamishaa waxaa ay ku faraxsan yihiin in ay dhiirri geliyaan xasilloonida balse waxaa ay walaac ka qabaan dhibaatada ay ku keeni karto guud ahaan Soomaaliya oo dhan ictiraafka si rasmi ahaan ah loo aqoonsado Somaliland. Gaar ahaan Afrikaanka la macaamilaa aad ayay xasaasiyad uga qabaan abuurista waddamo cusub oo loo abuuro qaaradda, maaddaama ixtiraamka xudduudihii uu ka tagay gumeysigu ay Midowga Afrika (AU) u tahay mabda'a aasaasi ah.

Nidaamka caalamiga ah waxaa ka jira ictiraafyo kala heer ah.

Waddan la aqoonsan yahay: waddanka la aqoonsan yahay waa heerka ugu sarreya, Wuxaan uu leeyahay ictiraaf buuxa oo aan sharcyan lagula murmeyn.

Wadan si aan buixin loo aqoonsan yahay: waddanka waxaa aqoonsan qaar ka mid ah beesha caalamka, laakiin maadaama muran ka taagan yahay xagga madax bannaanida iyo/ama xagga sharciyadda, kama wada tirsana hay'adaha caalamka. Tusaale waxaa ah Kosovo.

Meelo aan la aqoonsaneyn: meelahan waxaa suurta gal ah in ay u dhisan yihiin sidii Qaran, balse awood umalaha in ay Qarannimadooda meal mariyan. Somaliland waxaa ay ku jirtaa qoladan.

Somaliland waxaa ay ku dooddan in ay xaq u leedahay in la ictirafo iyada oo ku saleysan in ay si akhiyaarkeeda ah ula midowdey Soomaaliya 1960-kii, haddana ay madax bannaanida Somaliland ay ku imanyeso gooni isu taaggeeda. Sidaa darteedna ma ahan in waddan cusub la abuurayo. Dooddani waa mid xoog leh balse taageero siyaasadeed oo ka timaada wadamada kale la'aantood keligeed ma aha mid arinta ictraafka ku filan.

Somaliland waxaa hor yaalla in ay kala doorato halkeey ololaheeda diiradda ku saari laheyd. Waxaa ay culeyska saari kartaa in ay ictiraaf ka hesho waddan shisheeye oo saameyn leh, sida Mareykanka ama Itoobiya, oo laga yaabo in ay ku caawiyaan in ay soo gaarsiyyaan heerka Kosovo oo kale. Waxaa kale oo ay yeeli kartaa in madaxbannaanideeda ay oggolaansho uga hesho Muqdisho, taas oo horseedi karta in ay dunidu si baahsan u aqoonsato. Labada dariiqadood midkoodna ma sahlana amaba waqtigan xaadirka ah uma muuqdaan in ay suurta-geli karaan.

Xiriirada ka dhexeeya Soomaaliya iyo Somaliland

Somaliland geerigo'an kama aha arrimaha ka dhacaya Soomaaliya. Weerarradii arga-gixiso ee 2008-dii lala eegtey Hargeysa iyo isqabqabsiga xudduudeed ee kala dhexeeya Puntland ayaa u ah tusaale cadeynaya ku xirnaanta aanay dooneyn ee Somaliland ay ku xiran tahay siyaasadda guud ee Soomaaliya. Dhaqdhaqaqa goosad doonka ah ee Sool, Sanag iyo Cayn (SSC) ayaa waxaa uu muujineyaa in dhaqanka Soomaaliya ee maamul goboleedyada oo ka go'a kuwii hore uu Somaliland iyadana saameynayo.

Si kastaba ha ahaatee waxaa kale oo jira xiriirro wanaagsan oo Soomaliya iyo Somaliland ka dhexeeya. Ururada bulshada ee ka jira guud ahaan Soomaaliya ayaa u adeegsada Somaliland meel nabad ah oo ay ku shaqeeyaan, dadka ka soo barakacay dagaalada ka jira koonfurta Soomaaliya ayaa iyaguna ku noolaan kara Somaliland. Ganacsiyo ka soo jeeda Somaliland ayaa ka shaqeeyaa dhammaan deegaanada Soomaalidu ee Geeska Africa. Waxaa sidoo kale jira xiriirro ka goosha xuduudda oo ka dhexeeya bulshada soomaaliyeed iyo hogamiyayaashhoodaba.

Somaliland miyey caawin kartaa Koonfurta?

Waqtigan xaadirka ah Somaliland waxaa ay awood u leedahay in ay si madax banaani ah oo aan horistaag laheyn u shaqeyso maadaama aysan dowladda dhexe ee Soomaaliya awoood ay ku hor istaagto laheyn. Balse haddii ay Somaliland ku guul dareysato in ay wax ka qabato xiiriirka ay la leedahay Soomaaliya inteeda kale waxaa suurta-gal ah in ay dhibaatooyin mustaqbalka ku iman doonaan. Caqabadaha iman kara waxaa ka mid ah in uu dagaalka ka jira koonfurta Soomaaliya uu ku soo faafo, amaba in ay mustaqbalka imaato is hor taag siyaasadeed amaba mid milatari oo kaga yimaada dowladda dhexe ee Soomaaliya oo markaa awood leh. Inkasta oo xiriirka ay Soomaaliya la yeelmaneyso uu yahay mid aad xasaasiyad u leh haddana ma aha mid la iska indha tiri karo.

Waxaa kulanka si cad uga muuqdey farqiga u dhexeeya halka ay Somaliland isu haysato inay dunida kaga jirto iyo waxa ay beesha caalamka inta la macaamishaa ay dareensan yihii in ay muhiim tahay in diiradda la saaro. Walaaca beesha caalamku wuxuu ilaa iyo hadda ku wajahan yahay oo udub dhexaad u ah maamulka dowlaadeed ee tabarta daran ee Soomaaliya iyo xasillooni darrada ka jirta. Guusha Somaliland waxaa loo arkaa in ay rajo u tahay sidii xal looga keeni lahaa koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Beesha caalamka ee iskaashigu kal dhexeeyo waxaa ay aad u daneynaysaa in ay hesho waddo ay Somaliland uga qeyb geliso nabad u raadinta koonfurta

Soomaaliya, ayagoo rumeysan in ay tahay maamul ka soo dhex baxay geeddi-socod nabadeed oo ay Soomaali hoggaamineysey guulna laga gaarey horeyna ugu tallaabsadey isbeddel dimuquraadiyadeed. Sidaa darteedna Somaliland ay aaraa' muhiim ah ku biirin karto geeddi-socodka guud ee nabadda Soomaaliya.

Dhanka kale dadka Somaliland aad uguma faraxsana in ay faraha la galaan dhibaatooyinka ka taagan Soomaaliya. Waxaa ay u arkaan in faa'iido badan aan laga heleyn khasaare badanna laga dhaxlayo in qeyb laga noqdo wada hadal aan u muuqan mid dhamaanaya iyo dagaal xasillooni darro ku keeni kara waqooyi-galbeed. In badan oo dadka Somaliland ka mid ahna waxaaba ay ku doodaan in arrimaha Soomaaliya aysan wax mas'uuliyyad ahi iyaga ka saarneyn. Tan iyo markii ay Somaliland sheegatey madaxbannaanida, xasillooni darrada Soomaaliya waxaa uun walaac looga qabaa in ay tahay waddan deris ah.

Balse waxaa suurta-gal ah in Somaliland ay wax badan ku lumin karto haddii bannaanka laga dhigo (amaba ay iyadu bannaanka iska dhigto) wadahadallada ku saabsan mustaqbalka Soomaaliya. Wadahadalladan waxaa ay keeni karaan heshiis siyaasadeed oo caalamku aqoonsan yahay laguna qorey dastuur oo isla markaa ka soo horjeedi kara danaha Somaliland. Marka dhankan laga eego waxaa jira sababo muhiim ah oo ku kallifaya in ay Somaliland, si ay khatar uga badbaaddo, in ay u bareerto ka qeyb galka geeddi-socodka guud ee nabad u helista Somaaliya.

Muhiimadda geeddi-socodka

Ra'yii muhiim ah oo kulankan ka soo dhex baxay waxaa uu hoosta ka xarriiqey faa'iidata ugu jirta Somaliland in ay si waaqici ah uga qeyb gasho geeddi-socod caalamku aqoonsan yahay, intii ay isku koobi lahayd in ay raacdoo waddo keli ololeyn ku dhisan xaq u dood iyo raadin xaq taariikheed.

Dooddan intii shirka ka qeyb gashay iskuma wada racin, waana la fahmi karaa in ay dad badan oo Somaliland ka tirsan ay ku adag tahay in ay aqbalaan in howl dheeraad ah laga doonayo. In badan ayaa dareensan in markey la dagaalameen maamulkii Siyaad Barre una halgameen dhisidda nabadda ay maanta istaahilaan in la ictiraaf. Sidoo kale siyaasiyiinta Somaliland khatar siyaasadeed oo dhab ah ayaa ugu jirta in loo arko in ay aqbalsan yihiin in howl dheeraad ah laga doonayo inta aan ictiraaf la gaarin, amaba in ay si baaxad weyn leh uga qeyb galaan wadahadallada mustaqbalka Soomaaliya. Arrintu si kastaba ha ahaatee in badan oo ka mid ah ka qeyb galayaasha ayaa arka faa'iido in ay ku jирто in la abuuro geeddi-

socod Somaliland ku ridaya toobiye ay si sharci ah ugu xaqijiso hammigeeda.

Waxaa tusaale ahaan loo soo qaatey khibradda jabhaddii SPLM/A ee koonfurta Suudaan oo ka qeyb qaadatey geeddi-socod dunidu aqoonsan tahay kaas oo ay ku gaartey ictiraaf. Arinkan Suudaan waxaa ku heshiiyey laba dhinac oo kala shakisanaa. Arinkaas oo jira ayaa lagu heshiiyey farsamo dastuur, taas oo dadku qaar u arki kareen in aysan boqlolkiiba boqol aheyn, balse si muhiim ah labada dhinac u ballan qaaday xuquuq aasaasi ah jeexdeyna dariiq lagu gaarey madax banaani la ictiraafsan yahay. Heshiiskii nabadgeyada ee Suudaan oo loo yaqaaney (Comprehensive Peace Agreement CPA) ayaa noqdey dastuurka u ballan qaadayey ictiraafka Koonfurta Suudaan oo ku hagaajiyyey waddo sugar oo sharci ah.

Koonfurta Suudaan heshiiskaas CPA ayaa wadaadaa u jeexey. Inkasta oo ay jirtey xasaasiyad ay qaar ka qabeen in ay koonfurta Suudaan waddan jira oo madax bannaan oo meelmar ah noqon karto, haddana xaqa ay u laheyd in la ictirafo bishii Luuliyo ee sanadkii 2011 lagama doodi karin sababta oo ah heshiiskii CPA ayaa si rasmi ah ay hore ugu aqbaleen labada dhinac horeyna beesha caalamku u ictiraaftey.

Shisheeeye badan oo ka tirsan beesha caalamku ma ictiraafi doono Somaliland ilaa ay dowlad dhexe oo Muqdisho ka dhisan ay ictiraafsto. Balse, haddii Somaliland ay gasho heshiis kii CPA la mid ah, waxaa la abuuri karaa xaalad lagu ilaalinayo waaqica hadda ka jira Somaliland isla markaana ay beesha caalamka ee la macaamishaa ay si ka sii gacan furan ay ula shaqeyn karaan Hargeysa, si kastoo aysan u jirin ictiraaf degdeg ah. In la galoo wada hadal amaba la billaabo geeddi-socod kuma ay khasbeyso mid ka mid ah dhinacyada in uu aqbalo sheegashada kuwa kale. Waxaa suurta-gal ah in dhammaan dhinacyadu ay ku heshiyaan in ay waxyaalaha qaarkood ay isku diiddan yihiin, sida martabadda Somaliland, balse isla markaa waa ay ka qeyb gali karaan wadahadallo faa'iido soo kordhiya.

Gunaanad

Waxaa weli xasaasiyad ka jirtaa kala duwanaanshaha u dhexeeya rajada ay beesha caalamku ka qabto in ay Somaliland ka qeyb gasho geeddi-socodka nabadeed ee Soomaaliya iyo ku dheganaanshaha Somaliland ay ku adkeysaneyso in ay gooni ahaato. Si kastaba ha ahaatee, Somaliland way ka faa'iidi kartaa in ay qeyb ka ahaato geeddi-socod rasmi ah oo soo kordhin kara waddo lagu sharchiyeeyo xaaladdeeda marka laga eego sida ay u arkaan Soomaaliya, Midowga Afrika iyo beesha caalamkuba.

Taa macnaheedu ma aha in laga tagayo horumarka ay Somaliland ku tallaabsatey. Balse horumarkas ayaa Somaliland siinaya cod awood leh marka laga wada hadlayo dariiqa mustaqbalka. Geeddi-socodka noocan ah waxaa uu keeni karaa fursad lagu helo ictiraaf buuxa oo aysan keeni karin ku tiirsanaanta qaddiyadaha caadifadeed amaba doodaha ku saleysan taariikhdu. Ma aha arrin sahan in dad badan oo reer Somaliland ah ay aqbalaan in howlo dheeraad ah laga doonayo; waxaaba laga yaabaa in ay u muuqato in aysan gar aheyn in sidaas laga dalbado. Balse hadday tahay wadada keliya ee suurtagalka ah ee ay Somaliland ictiraafka ay xaqa u leedahay ku gaari karto, waxaa laga yaabaa in ka qeyb galka waaqiciga ah ee nabad raadinta guud ee Soomaaliya ay tahay kallifaad ugu danbeyntii u galanta in la isa saaro.